

# Hadal baa hadhaa loo hadlaa

Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo

June 04, 2010

---

*Sidii hore looba yidhi  
Hadalku wuu kala hufnaa  
Han iyo heel buu lahaa  
Godkiisa markaanad hayn  
Hobaaq baa lagu dhacaa  
Inaad ka hadhaa habboon!*

Qoraalkii ladhkiisu ahaa '*Aragtida Carraale iyo ta Gaarriye ee miisaanka maansada iyamaa mucweyn?*' ee ku soo baxay degelka <http://www.somalilandstudies.com> mar dambane lagu soo saaray degelka [www.wardheernews.com](http://www.wardheernews.com) ayaan ku dadaalay inaan kaga warceliyo codsi uu Prof. Carraale dhawr madalood kaga dhawaaqay. Codsigaasi wuxu innagu dhiirrigelinayaa inaan isku dayno sidii loo ogaan lahaa waxay ku kala duwan yihiin iyo sida ay u kala waxtar badan yihiin aragtida Carraale iyo ta Gaarriye. Si arrintaa looga niib gaadho waxan soo jeediyeey siddeed qodob oo aan hal-beeg uga dhigay. Waxanan in taa ku daray inaanay aragtidaydu ahayn mid bir lagu jiray oo laygu diidi karo, wax lagu biirin karo, waxna laga dhimikaro. Ujeeddadaydu may ahayn in muran ka aloosmo. Waxanse filayey inuu qoraalkaasi hormood u noqodo baadhitaan iyo barasho hor leh oo loogu noqdo labada aragtiyood ee Miisaanka Maansada oo haddii la hormarin karo la sii hormayiyo. Hayeeshee, Idiris M. Ali baa qoraal falcelis ah oo la yaab badan lana yidhaa '*kala saaruhu muu isa saaro*' soo saaray ([www.wardheernews.com](http://www.wardheernews.com)).

Qoruhu wuxu isku deyey inuu buriyo aragtidayda, taasina mid aan filayey ayay ahayd. Hayeeshee, intuu anshaxii iyo asawdii qoraal lahaa meel ku tiirshay buu igu xariiray inaan cid garab siiyey, hadalkiisii oo dhammina wuxu isugu biyo shubtay: kacoo ila muran.

Si aan haddaba isaga balfiyo awlaxaas xajiinta xambaarsan, waxan qoraalkan kooban idinku tusaalayn sida uu qoruhu, wuxuu soo kordhiyo ha joogtee, u dhex fadhiistay aqoontii afka ee uu ku faanayey iyo weliba sida aanu u burin, una burin karayn qodobbadii aan soo sheegay. Waxa kale oon sheegi sida ay hadaladiisa qaar uba yihiin af lagaaddo aanu geedna ugu soo gabban oo uu ugeystay garaadka iyo garashada dadka Soomaaliyeed.

---

**Hadal baa hadhaa loo hadlaa**  
Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo  
Copyright© 2010 WardheerNews

Idiris M. Cali wuxu ku dadaalay inuu, qaybta hore ee qoraalkiisa, wax innaga baro afka. Isaga oo muujinayaa aqoonta iyo xeeldheerida uu u leeyahay abla ablaynta afkana wuxu inna soo hordhigay jaantuskan hoos ku xusan ee odhanaya:



Jaantus 1. Aroorka Afka

### ***Waxan ka soo dheegtay qoraalkii Idiris***

Akhriste, bal si aad ah ugu fiirso jaantuska uu qoruhu la shir yimid. Wax kalaba ha innoo danbeeyaane, suugaanta iyo ereyga iyamaa horta hor samaysma ama la hor bartaa? Waxan u malayn inuu qorahani yahay nin ka yimid adduunyo kale! Waayo adduunka laguma hayo dad ku af dillaacsada curinta suugaanta ayaga oo aan baran hal iyo hawraar midna.

Waxa halkan ka muuqata inuu qoruhu, waa Idirise, ka soobaxay Jaamacad yaab leh oo isaga u gaar ah. Waayo weli ma arag, isaga mooyee, cid tidhaa eraygu wuxu u qaybsamaa tix iyo tiraab. Intuu ka sii daray buu innaga dhaadhicinayaa in maansaduna tixda ka farcanto. Haddaba cid walba aqoon yahan laguma sheegee, ninkaasaan gacanta u taagay. Hadalkiina aan ku soo gaabsho:

Digtoorkii wacnaayow  
Sawdigan cidlada degey!

Mar kale isaga oo qoruhu aqoontiisa iyo xeeldheeridiisa muujinaya oo inna baraya eray bixintii Prof. Carraale wuxu qoray sidan:

**Meeris:** Sadar ama beydka maansada

**Hojis:** Qaarka hore ee meeriska gabayga

**Hooris:** Qaarka dambe ee yar ee meeriska gabayga

\* **Alan (dhawaq):** Shaqalka oo dheer iyo gaabba ay simanyihiin: A, EE, I, OO, U


**Shaqal-dheere:** Waad taqaan oo waa: AA, EE, II, OO, UU

**Dhafane:** Waxa uu badanka u dhigmaa shaqal-dheeraha (mararka qaarna shaqal-gaabka), waana: AY, OW, AW, EY...

Halkanna bal u fiirsada sida uu u qeexay erayga ‘alan’. Sida uu u qeexay ujeeddada erayga waxa inooga muuqata aqoon darro aan yarayn. Qoruhu maaha mid kala yaqaan ‘alan’-ka iyo ‘shaqal’-ka. Aynu toosinnee, malaha af Ingiriisku si fiican u yaqaanne, ‘alan’ waa waxa afka Ingiriiska loogu yaqaan ‘Syllable’. Sida uu Barwaaqo u qeexayna kolka shibbane (*Consonant*) iyo shaqal (*vowel*) israacaan baa la

yidhaa ‘Alan’. Shaqallada gaagaaban iyo kuwa dhaadheeritoona (*short and long vowels*) maaha alanayaal. Aan u sii balbalaadhinee afka Ingiriiska waxa ‘*syllable*’-ka loo kala saaraa sidan hoos ku xusan:

\* Bare sare Cabdillaahi Diiriye Guuleed ‘Carraale’ ereyga ‘alan’ wuxu u qeexay sidan: Alan = Xubin (syllable). Sidaasi awgeed, wixi uu Idiris innoo sheegay waa wax isaga ku gaar ah. Carraalana daanyaqaad uma ah.



Tusaale ahaan ereyga ‘Read’ waa hal alanle waxaanu u dhigmayaa sidan:

read = one syllable

**Onset** = [ r ]  
**Rhyme** = [ id ] (within the rhyme:)  
**Nucleus** = [ i ]  
**Coda** = [ d ]

Haddii aan aragtidaasi ereyga ‘Bad’ ee Soomaaliga ah ku bilkeedinno wuxu isna u qormayaa sidan:

Bad = hal alanle

**Onset** = [ b ]  
**Rhyme** = [ ad ]  
**Nucleus** = [ a ]  
**Coda** = [ d ]

Sidaasi baanay wixii uu Idiris inoo sheegay waxba uga jirin ee iska dhaqdhaqa.

Haddii aan gefekii ka buuxay casharkii qoraha intaa ku dhaafo, bal aan haatanna tilmaamo sida aanu waxba u soo kordhin ee uu cidla uun ugu meeraystay.

Qoraalkaygii waxan ku soo bandhigay siddeed qodab oo aan ku hal-beegay waxa ay labada Aragtiyood wadaagaan iyo inta ay ku kala geddisan yihiin. Dhurtina waxay noqotay in aragtida Carraale

fulin weydey afar qodob oo qodobbadaasi ka mid ah. Halka ay aragtida Gaarriye ka wada fulisay dhammaantood. Waxa haddaba looga fadhiiyey aqoonyahanku inuu buriyo aragtidaasi oo uu caddeeyo inay aragtida Carraale fulinaysa afartaasi qodob. Hayeeshee, qar buu jafay ee aan isla eegno.

Aan idin xasuusiye, waxan sheegay inaanay aragtida Carraale fulineyn qodobka 2aad ee hal-beegyadii aan soobandhigay. Waxaanu qodobaasi u qornaa sidan hoos ku qoran:

## 2.2. Agabka ay labada aqoon yahan kala adeegsadeen iyo waxtarkooda

- a. Gaarriye wuxu adeegsaday *shaqallada*. Waxaanu inoo sheegay in shaqalladu yihiin waxa codka sameeya. Isaga oo arrintaa tilmaamayana wuxu yidhi:

*Marka u horreysa waa inaynu isla garannaa inay ereyadu ka kooban yihiin shaqallada iyo shibbanayaasha. Shaqallada ayaana dhawaaqa sameeya. Kolkaas, waa iyaga waxa miisaanka gabayga dooroka weyn ka qaataa. (Barwaaqo, 2007:43)*

- b. Carraale wuxu isagu adeegsaday waxa loo yaqaan 'alanno' ( syllables). Kolka shibbane iyo shaqal israacaan baa la yidhaa 'alan' sida *ha, ka, ba, waa, faa, iwm*. Hayeeshee muu tilmaamin waxa codka samaynayaa waxa uu yahay. Isaga oo arrintaa ka hadlayana wuxu yidhi:

*... Iminka iyo haatanna, aynu ku bilawno habaynta nudda gabaygu ku xog leedahay iyo xeerarka u saldhigga ah. Aynu haddaba gudagalno e, waxa gabayga laga unkaa (iyo xubnaha kaleba) alammo la isu geeyo oo dabadeedna alkuma ereyo. Kuwaas oo hab gaar ah loo taxay ayaa dhisa hojis, ka dibna inta 'hooris lagu lifaaqo ayuu aloosmaa meeriska gabayga salka u ahi. (Carraale,2003:34).*

Carraale ma qeexin waxa kaalinta weyn ka qaata gabayga midka uu yahay. Waxa is weydiin leh waxa laaxinka samaynayaa ma alankaa mise waa shaqalka?

Si qodobkaasi uu mugdigu uga baxo bal marka hore ila eega tuducan tusaalah ah ee odhanaya:

Duur-xuli aan maayee

Haddii aan haddaba tuducaasi ku miisaanno aragtida Gaarriye wuxu u qormayaa sidan soo socota:

Duur-xuli aan maayee  
2 1 1 (2) 2 2

Waxana hubaal ah inuu yahay mid laaxin ku jiro. Waayo waxa jabaya shardigii 1aad ee jiiiftada ee odhanayey:

- *Beyd kasta oo jiifto ihi waa inuu noqdo sagaalle ama tobanley ay xundhurtu isu dheelli tirto.*

Xundhurtu waa tirada labada bilood ku dhexjirta (2), marna ma noqon karto laba shaqal. Haddii aan,

haddaba, is nidhaa laaxin saara tuducaasi waxa uu u qormayaa sidan hoos ku xusan:

Duur-xuli an maayee

$$2 \quad 1 \quad 1 \quad (1) \quad 2 \quad 2$$

Waxa, haddaba, halkaasi innooga dhuroobay in laaxinka tuducaasi galay ahaa shaqal ee aanu ahayn alan. Waana taasi ta keentay inaan idhaa Carraale ma kala qeexin waxa laaxinka samaynaya. Sidaasi darteed, baanu qoruhu u burin qodobkaasi isaga ah.

Qodobka kale ee ay fulinwayday aragtida Carraale wuxu ahaa ka 5aad oo isna u dhignaa sidan hoos ku qoran:

2.5. Xidhiidhka ka dhexeeya badaha maansooyinka:

Qodobkan waxan isagana ku eegi sida ay uga hadleen xidhiidhka ka dhexeeya badaha kala duwan ee maansooyinka. Sida awgeed bal aan ku horrayno:

**a. Aragtida Gaarriye**

Gaarriye wuxu sheegay inuu xidhiidh weyni ka dhexeeyo badaha kala duwan ee maansooyinka. Wuxuna bartilmaameed ka dhigtay jiftada sida tusaalahan:

Dig dheh deelka maansada

$$1 \quad 1 \quad 2 \quad (1) \quad 2 \quad 1 \quad 1 = 9$$

Waxaanu yidhi, “Haddii hal shaqal lagu daro shaqallada jiftada waxa innoo soo baxaysa es cusub oo ah ta haanta lagu lulo, taasi oo tidhaa:

Haantii qabooy qoor yar

$$2 \quad 2 \quad (1) \quad 2 \quad 2 \quad 1 = 10$$

(... faahfaahinta qaybkan ka eeg degelka [www.somalilandstudies.com](http://www.somalilandstudies.com) ama [www.wardheernews.com](http://www.wardheernews.com) )

- **Aragtida Carraale:**

Carraale oo hawl yaableh qabtay marna ma tibaaxin inuu jiro wax xidhiidh ah oo badaha maansooyinka ka dhexeeyaa. Buuggiisa, miisaanka maansada Soomaaliyeed ee soo baxay 2003dii iyo qoraalladiisii kala duwanaa (Xiddigta Oktoobar, 1978) midna kuma sheegin hadal murtiyeed kooban oo aan furfurikarro. Maanso kastana iskeeda ayuu u miisaamay. Waxase la dareemayaa bado kala jaad ah oo uu isku mid u arko. Tusaale ahaan, wuxu leeyahay heesta cawsku waxay la qaab dhismeed tahay jiftada. Waxaanu qoray sidan:

$$\text{Gaashaamo iyo hawd} = 6,3 \quad \text{iyo} \quad \text{Cawskanaw sabool diid (-ow)} = 6,3$$

Sidaasi awgeed qodobkan aragtida Carraale ma fulineyso.

Isaga oo Same Idiris M. Ali isku deyaya inuu buriyo qodobkaasi buu qoray sidan hoos ku xusan:

reer Jabuuti soo kordhiyeen eray-bixinno hor leh oo lagu sii lafo guri karo meeriska maanso kasta. Tusaale ahaan, waraaq<sup>5</sup> ay wada qoreen Maxamed C/laahi Riiraash iyo Martin Orwin waxa ay ku xuseen in meeriska gabayga ah oo la kala jajabiyaayi ay ka dhashaan dhammaan maansooyinka toosan. Dhanka eray-bixinta, waxa ay culimada reer Jabuuti xundhurtii shaqal gaabka ahayd u bixiyeen guntin, iyaga oo afarta shaqal ee guntinta ka horeeyana u bixiyeey xubin (hadduu hal-shaqal gaabi ka maqan yahay xubinta waa xubin-taban, haday afarteeda shallo gaab wadatana waa xubin togan); taas oo u qaybsanta laba xag oo midiba laba shaqal oo dhaadheer wato, kadibna intaba ku magacaabay waax. Tusaale, uu = W, u = V :

Waxanad halkaa ka arkaysaan inaanu qoruhu garan cidda aan ka hadlay cidda ay ahayd. Waa run oo Maxamed Cabdillaahi Riiraash iyo Martin Orwin way yidhaahdeen hadalka halkaa ku xusan. Hayeeshee waxaanu garan inaanu *Cabdillaahi Diiriye Guuleed ‘Carraale’* ahayn ka hadalkaasi yidhi.

Qodobka 7aad wuxu isna ahaa mid kale oo ka mid ah kuwii aan idhi aragtida Carraale ma fulinayso. Wixii aan qorayna waxay ahayd:

### 2.7. Xisaabta iyo miisaanka

Gaarriye wuxu si toosa innoogu sheegay in miisaanka maansadu ku fadhiyo xisaab iyo qaaciidooyin ee aanay ahayn wax jaantaa rogan ah. Hadalkii aan soo xusnay ee ahaa: *Mar kasta oo aad shaqal soo kordhiso ama dhinto waxaad ku turunturoonaysaa maanso cusub, maxaa qurux ku jirta afkeenna.* ( *Barwaaqo 2007:49*), waxan kolkii hore ku caddaynay jiritaankiisa garaaf laad. Kolkanna waxaynu ku caddayn xisaab ahaan. Waxana loo qori karaa sidan hoos ku cad:

1. **Jiifto** <sub>sagaalley ama tobanley</sub> + **1** = **Heesta** <sub>haanta</sub> ama **Jiifto** <sub>sagaalley ama tobanley</sub> = **Heesta** <sub>hanta</sub> - **1**

Haanyahay qaboy qooryar

2 1 1 (1) 2 2 1

*Laba qaar lagu kala jar*

1 1 2 (1) 2 1 1 1

(...Faahfaahinta ka eeg [www.somalilandstudies.com](http://www.somalilandstudies.com) ama [www.wardheernews.com](http://www.wardheernews.com))

Waxan u malaynayaa in arrintani Qoraha ku adkaatay ee bal aan si kale u dhigo. Haddii aan Jiifto sagaalley ama tobanley u bixiyo ‘X’, Heesta caanahana u bixiyo ‘Y’ waxan hadalkii Gaarriye u qori karnaa sidan hoos ku qoran:

$$X + 1 = Y \quad \text{Intaa miyeynaan haddana u qorikarin sidan kale?}$$

$$X = Y - 1$$

Intaa haddii aad ila garateen ‘X’-da ku beddel ‘**Jiifto** <sub>sagaalley ama tobanley</sub>’ halka ‘Y’-dana ku beddel ‘**Heesta** <sub>haanta</sub>’. Miyeynaan, haddaba heleynin qaaciidada koobaad ee kor ku xusan?

Aragtida Carraale kuma jirto xisaab ama qaaciido sida taas oo kale ah oo wax laga tuujin karaa. Waxa keliya ee jiraa waa tirada alan iyo ta shaqal dheere ee tuducyada ku jira. Tusaale ahaan:

Haantii qaboy qoor yar (6,4)

Waxana halkaasi inooga cad inaanu qoruhu, waa Idirise, kala aqoon tirada iyo xisaabta. Sidaasi awgeed, qoruhu qodobkanna ma burin mana burin karo.

Qodobka 8aad ee hal-beegyada u dambeeya waxan ku tilmaamay inaanay badaha wiglo, hirwo, dhaanto ama baarcadde iyo heesta caanaha, ama jiipto iyo heesta cawsku isku qaab dhismeed ahayn. Hayeeshee, qoruhu wuxu ku adkaysanayaa inay dhammaantood isku mid yihiin. Wax taageero ahna muu sheegin. Waxa, haddaba, iga weydiin ah dadka Soomaaliyeed maxay waxaas oo maanso ah oo isku wada mid ah ugu kala bixiyeen magacyadaasi kala wada duwan?

Hadal iyo dhammaantii, horaa loo yidhi: ninkaad kabo ka yeelanayso kabahiisaa la eegaaye, ninka wax innoosheegayaa waa ninka kala garan la' eray iyo hawraar midka la hor barto. Ciddii haddaba wax ka dhegey-sanaysana iyaday jirtaa. Hase ahaatee arrinta qorahan waxa lagu tilmaami karaa ama ay tahayba af lagaaddo loola badheedhay garaadka iyo garasha dadka Soomaaliyeed. Waxase dhab ah sidaa ay badahaasi u kala magacyo yihiin in qaab dhismoodkooduna u kala wada duwan yahay.

Guntii iyo gabagabadii, qoraalkan kooban oo aan kaga warcelinayey qoraalkii ahaa: *Kala saaruhu muu isa saaro*, waxan ku caddeeyey aqoon yarida qoraha (Idiris M. Ali) ee dhanka af Soomaaliga, aniga oo ku dadaalay inaan intii karaankay ah toosiyo si uu qoraalkana wax uga taransado. Waxa kale oo aan tilmaamay sida aanu qoruhu u burin afartii qodob ee ay aragtida Carraale fulinweyday. Waxa kale oo xusid mudan sida aanu waxba u soo kordhin oo sidii murtidii Soomaalidu tidhi aanu u hadal, hadal baa hadhay baa loo hadlaa ee uu arrinkiisu ahaa anaa hadhay oo hebel baan la dooday.